



# San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER  
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

---

Terry B. Grier, Ed.D.  
Madaxa Waxbarashadda

Maajo 2008

Mudane Waalidiin iyo Dadka ilmaha masuulka ka ah:

Bishii koowaad waxay ii ahayd mid aan mashquulsanaa, wanaagna lahayd. Waxaa sharaf weyn ii ah inaan ilaa iyo hada booqdey 20 dugsi, waxaan toddobaadyada soo socda booqan doonaa dugsiyo badan.

Waxaan la kulmey ardey badan oo dhigata dugsiyada San Diego, waxaan aad uga helay sida ay mustaqbalkooda ay u arkaan iyo rajada wanaagsan ee ay muujiyeen. Ardeydeenu waxay sii wadi doonaan halganka waxbarashadda, isla mar ahaantaasna, waxaa la siineyaa ikhtiyaariyo waxbarasho oo dheeraad ah. Ardeyda dugsiyada sare dhigata waxay ii sheegeen inay rabaan koorsooyinka Meeleynta Sare (AP) oo badan iyo ikhtiyaariyada barashada luuqadaha ajinebiga ah iyo tababarada. Ardeydaas dugsiyada sare ra'yiga ay soo gudbiyeen waxay muhim inoogu tahay inaan dejino waxyaabaha sannadka soo socda.

Waalid ahaan waxaad ii sheegteen inaad rabtaan ikhtiyaariyada ay ardeydu sheegteen mid la mid ah, waxaan idiin ballan qaadeyaa inaan idin dhageysano.

Waxaan kale oo aan dhageysanay walwalka aad ka qabtaan arrimaha ku saabsan miisaaniyada. Si wanaagsan ayaad uga jawaabteen farriintii ahayd "maxaan sameyn karaa?" Waraaqo ayaad u qorteen madaxda la soo doorto, telefoono ayaad ku wacdeen, isla mar ahaantaasna, bannaanbaxyo ayaa sameyseen. Waxaad sameyseen in codkiinna la maqlo, taas oo aad iyo aad muhim u ah. Wakhtigii aad miisaaniyada saameynta ku sameyn lahaydeen ayaa hada la joogaa.

Maxaad kale oo aad sameyn kartaa? Waxaad hubsan kartaa inuu ilmahagu dugsi yimaado maalin kasta, marka uu caafimaad qabo. Marka uu ilmuhu dugsi ka maqnaado, waxyaabo badan ayaan waayeynaa. Imaanshaha joogtada ah ee uu ilmuhu dugsi yimaado waxay saameyn toos ah ku leedahay sida uu ardeygu uu waxbarashadda ku noqoneyo.

Taasi waxay kale oo xidhiidh la leedahay miisaaniyada. Dawlad-goboleedka California waxay miisaaniyada dugsiyada ku siisaa iyada oo fiirineysa Celceliska Imaanshaha Maalin kasta ee ardeyga (ADA). Maalin kasta oo uu ilmuhu dugsi ka maqnaado, waxaa dugsi ka go'aya lacag dhan \$50. Haddii ay dugsi ka maqnaadaan maalinkasta 25 ardey ee muddada lagu jiro sannad-dugsiyeedka (180 maalmood), taas waxay sababaysaa in la waayo miisaaniyad lacageed oo ka badan \$225,000. Arrintaas macnaheedu waxaa weeyaan in la waayo barnaamijyada wax dhigista iyo qalabka loo baahan yahay oo qiimo weyn leh. Waxaas kale oo muhiim ah, in la waayo macallimiinta iyo shaqaalaha – oo ah dadka waxbarashadda tayada sare leh ardeyda siiyaa.

Waad ku mahadsan tihiin waxyaabaha aad ilmaha guriga inta uu joogo aad ku caawisaan, si uu waxbarashadda guul uga gaadho. Faraq weyn ayey sameysaa. Waxaad kale oo aad ku mahasan tihiin taageerada iyo wada shaqeynta aad sida wadajirka ah dugsiyada ula sameysaan.

Si Daacadnimo ah,

Terry B. Grier, Ed.D.  
Madaxa Waxbarashadda

**Somali version: May08 PTA**

---